

# Farta Baanbolo

## Waxqabadyada

# PUPPETalk™

**PUppets to Play, Praise, Educate, and Talk®**

Waxaad tahay macalinka koobaad ee ugu muhiimsan cunugaaga. Waxaynu ognahay in la hadalka ilmuhu yahay qaabka ugu muhiimsan ee lagu koriyo maskaxdiisa. Baanbolada faruhu waxay idinka caawin doontaa adiga iyo xubnaha kale ee qoyskaba inaad la hadashaan cunugaaga. La hadal markaad cunto siinaysid, u qubaynaysid, oo la ciyaar cunugaaga. La hadal markaad ka badelaysid xafaayada oo fadhiisi cunugaaga kursiga gaadhiga. Yeelo hal-abuur iyo madadaalo l ilmo kasta waa gaar, sidaasi darteed kudar kala duwanaanshahaaga oo abuur waxqabadyo cusub.

**Xataa marka aanad haysan baanbolada farahaaga, xasuuso inaad markaste la hadashid cunugaaga!**

01 **Magacow baanbolada farahaaga** oo u isticmaal Cod dhiirigalinaya oo degan.

02 **Samee cod xashaashuq, jiiqjiiq ah, oo xaraamaad ah.** Iska dhig ama ku celi codadka cunugaagu moodayo sida inaad ku celcelinayso oo kale.

03 **Ku dhawaaq magaca cunugaaga adigoo kor iyo hoos iyo dhinac-dhinac u qaadaya baanbolada farahaaga.** Iskuday in cunugaagu raaci karo dhaqdhaqaagaaga. La ciyaar dhuumaalaysi adoo qarinaya marna banaynaya baanbolada farahaaga. Waxaad odhan kartaa: "Meeday baanboladii farahaagu? Waa tan! Shaqo wanaagsan, waad heshay baanboladii farahaaga!"

04 **Caruurta yar-yari waxay jecel yihiin taabashada naxariistada leh iyo masaajka.** Dul fadhiisi cunugaaga kursiga-fadhiga buste dushii ama duraaxad. Ku wareeji gacmihiisa farahaaga adoo isticmaalaya cadaadis fudud. Duug ilaa cagtiisa oo aad ka dareemi kartid dareenkiisa. La hadal cunugaaga, adoo u sheega inuu qurux badan yahay una magacaabaya qeybaha kala duwan ee jidhka. Ku ciyaar faraha lugihiisa oo ku dar ***Doofaarkan Yari Wuxuu Aaday Suuuqa*** **hees ah.**

05 **Fiiri sawriada buugta iyo jaraayidada.** Magacow oo sheeg waxaad aragtid. Cunugaagu wuxuu gaar ahaan jeclaan karaa fiirinta midabada cadaanka iyo madowga, kuwa iftiinka leh, iyo astaamaha.

06 **Dhex soco guriga oo wax ka ogow.** Magacow oo kala hadal ashyaada kala duwan ee aad ku aragtid. Sharax midabada, tirooyinka, xajmigha, qaababka, iyo muuqaalada.

07 **Wax ka ogow dibada adoo isticmaalaya dareemada.** Cunugaagu ha arko, ha taabto, oo ha uriyo daaqa, dhirta, iyo ashyaada kale. Dareen naacowda, dhageyso shinbiraha, oo uri ubaxyada. Baanbolada farahaagu waa inay sharaxdaa waxyaabahan marka cunugaagu ogaado ee uu wax ka barto.

08 **Akhri bugaagta fudud.** Magacow ashyaada oo sharax midabada, qaababka, iyo faahfaahinta kale ee sawirada.

09 **Ku hees heesaha oo sheeg jiibta** sida *Twinkle Twinkle Little Star*, *Old MacDonald Had a Farm*, the *Hokey-Pokey*, iyo qaar kaloo badan! Miyaad xasuusataa hees aad jeclayd ciyaalnimadaadii? Miyaa baanbolada farahaagu si degan u taabataa garaaca wadnaha cunugaaga oo ku keentaa ruxanka muusiga uu dareemayo cunugaagu jiibta.

10 **U dhigsta beerka ee cunugaagu waa u muhiim inuu helo xakameynta madaxa.** Dusha kursiga-fadhiga iyo meel siman, u dhig cunugaaga beerkiisa. Isticmaal baanbolada farahaaga si ay uga caawiso in cunugaagu ogaado baanbolo cusub oo ka fiiriyo muraayada. Ku wareeji baanbolada farahaaga cunugaaga si aad ugu dhiirigalisid inuu dhaqdhaqaajiyo madaxiisa oo helo baanbolada.

E PUPPETalk@cuanschutz.edu W PUPPETalk.org

©2017 The Regents of the University of Colorado. All Rights Reserved.